Bath&BodyWorks

# BATH & BODY WORKS
# SIYAASADDA KAHORTAGTA FARAXUMAYNTA

## HORDHAC

Bath & Body Works (oo ah “Shirkadda”) waxay aaminsan tahay inuu qof kasta u qalmo goob ay ku dareemaan ammaan, ixtiraam iyo ku qiimeynta dadka, sida ay yihiin. Habdhaqanka aan habboonayn ee goobta shaqada iyo dhibaataynta sharci darrada ah waxay abuurtaa xaalado aan waafaqsanayn ballanqaadkan iyo qiyamyadayada.

Ujeeddada Siyaasaddan Kahortagta Faraxumaynta (oo ah “Siyaasadda”) waa in la abuuro oo la joogteeyo jawi shaqo oo ka madax-bannaan dhammaan noocyada faraxumaynta, haddii dhibaatayntaas ay tahay mid la xiriirta jinsiga dhabta ah ama loo qaateenka ah (oo ay ku jiraan uurka, dhalmada, naasnuujinta/nuujinta ilmaha, ama xaalad caafimaad oo la xiriirta), nooca galmada (oo ay ku jiraan jinsiga qumman, khaniisnimada, iyo laba-jinsiilenimo), aqoonsiga jinsiga (oo loola jeedo waxa qofku aaminsan yahay inuu jinsigiisa yahay, ama aragtida aqoonsiga jinsiga ee qofka, taasoo ay ku jiri karaan lab, dhedig, laba-jinsile, jinsi-laawe, jinsi ka duwan midka qofka loo nisbeeyay xilliga dhalashada, ama sinji-guur), ama muujinta jinsiga.

Siyaasaddani waxay khusaysaa dhammaan danwadaagta, dadka kale ee aan sida caadiga ah loo qeexin inay yihiin danwadaag, sida shaqo codsadayaasha, shaqaalaha ku jira carbiska ee shirkadda iyo kuwa shirkadda ka baxsan (haddii ay qaataan mushaar ama haddii aysan qaadanba), tababareyaasha, qandaraasleyaasha madax-bannaan, qandaraasle-hoosaadyada, shaqaalaha kumeelgaarka ah iyo la-taliyayaasha, iyadoo aan loo eegin xaaladda socdaalka. Siyaasadani ayaa sidoo kale khuseysa macaamiisha, iibiyeyaasha, qandaraasleyda, shuraakada ganacsi ama shuraakada ganacsi ee suurtagalka ah oo dhan iyo dhinacyada kale ee saddexaad markay nala shaqeynayaan ama ay ku sugan yihiin dhismahayaga, waxaana fileynaa oo u baahannahay in loola dhaqmo si ixtiraam leh iyo inay u dhaqmi doonaan qaabab la jaanqaadaya dhaqankayaga ixtiraamka leh.

Ku xadgudubka Siyaasaddan Kahortagga Faraxumaynta Galmada waxay horseedi doontaa tallaabo anshax-marin, oo ay ku jirto shaqo ka ceyrin suurtagal ah.

## QEEXITAANKA FARAXUMAYN

Faraxumaynta waa nooc takoor ah oo sharci-darro ah oo ka dhaca goobta shaqada oo u horseedi kara shirkadda iyo danwadaagta gaarka ah in lagu soo rogo mas'uuliyad sharciyeed. Waxaa ka sii muhiimsan, faraxumaynta waxay lid ku tahay siyaasadahayaga iyo qiyamyadayada. Dhibaataynta waxay dhaawac joogto ah u keentaa dadka ay la kulma ama arka, waxay hoos u dhigtaa niyadda iyo wax-soo-saarka guud ahaan, waxayna dhaawacdaa dhaqanka, sumcadda iyo muuqaalka Shirkadda. Waxay burburisaa dhaqanka ixtiraamka loo wada siman yahay, ilbaxnimada, iyo u wada dhanaanshaha aan raadinayno inaan joogteyno.

“Faraxumaynta,” oo loola jeedo dhammaan habdhaqanada galmo ee aan la rabin iyo dhabdhaqanada galmada la xiriira oo dhan, waxaa ka mid ah 5 qaybood oo muhiim ah oo anshax-xumo ah:

1. Is qadimidda galmada ee aan la rabin, dareenka ama faallooyinka soo noqnoqda;

2. Galmada khasabka ah, taasoo loola jeedo dareenka galmo ee aan la rabin oo lagu kabay hanjabaad ama laaluush oo la xiriira shaqada;

3. Faraxumaynta galmada la xiriirta, taasoo ku lug leh habdhaqan kasta oo aan la rabin oo lagula kaco shakhsiga iyadoo ugu wacan jinsiga qofkaas. Galmada waxaa lagu qeexaa inay ku jiraan nooca galmada, jinsiga qofku isku aqoonsan yahay ama jinsiga loo qaateenka ah, aqoonsiga jinsiga, muujinta jinsiga, ama heerka sinji-guurnimo;

4. Dhibaataynta ku salaysan fikradaha khaldan ee laga aaminsan yahay jinsiga, ee dhaca marka dabeecadda ama habdhaqanka shakhsiyeed ama dabeecadda loo arko inay yihiin kuwo aan

habboonayn iyadoo sababtuna tahay inaysan waafaqsanayn fikradaha dadka kale ee ku saabsan sida shakhsiyaadka jinsi kale leh ay tahay inay u ekaadaan ama u dhaqmaan. Fikradaha khaldan ee laga aaminsan yahay jinsiga ayaa sidoo kale dhaca marka habdhaqanka dhibaataynta uu ku salaysan yahay male-awaalka ku saabsan mas'uuliyadaha qofka ka saaran qoyska, sida u qaadashada in haweenku yihiin daryeelayaasha aasaasiga ah oo aabayaashu ay tahay inay qaataan fasax waalidnimo; iyo

5. Dhibaataynta ku salaysan uurka, dhalmada, ama xaaladaha caafimaad ee la xiriirta ee shaqsiga, oo ay ku jirto naasnuujinta.

Faraxumaynta waxay sidoo kale abuuri kartaa jawi shaqo oo cadowtinimo leh marka:

- u hoggaansamida habdhaqanka noocan ah in si cad ama si daahsoon loogu muujiyo shuruudda ama xaaladda shaqo ee shaqsiga; ama

- u hoggaansamida ama diidmada habdhaqanka noocan ah in loo adeegsado in aasaas looga dhigo go'aannada shaqo ee saameeya shakhsiga; ama

- habdhaqnka noocaan ah wuxuu si aan macquul ahayn u faragaliyaa waxqabadka shaqo ee shakhsiyeed ama waxay abuurtaa jawi shaqeed oo cabsi-gelin, colaad ama weerar ah.

Hoos waxaa ku yaala liis aan dhammaystirnayn oo ay ku qoran yihiin tusaalayaasha waxa noqon kara dhibaatayn galmo ama jawi shaqo oo cadaawad leh.

1. Hanjabaadain la qaado ama qaadida tallaabo(-ooyin) shaqo oo ka dhan ah qofka, sida cayrinta, xiltirka, haddi ama ka wareejinta shaqada, haddii aan takrifal galmo aan la oggolaan.

    - **Tusaale**: Bob wuxuu u sheegay shaqaale ka darajo hooseeyo in haddii ay diido inay isaga galmo la samayso, uu shaqada ka cayrin doono.

2. Dalbashada takrifalka galmo ama u hoggaansamida galmada si loogu beddesho daaweyn la rabo ama la doorbidayo.

3. Xodxodashada aan la rabin oo soo noqnoqota, soojeedinada kalgacal, isku soo qadimida galmada, ama faallooyinka galmada ku salaysan.

    - **Tusaale**: Janet waxay si joogta ah ugu amaantaa muuqaalka jireed ee qof danwadaag la ah, iyadoo u sheegaysa inuu soo jiidasho leeyahay. Bogaadintani waxay danwadaaga ka dhigtaa mid aan u riyaaqin, balse Janet weli way sii waddaa inay ammaanto xitaa kadib markuu danwadaagu ka codsado inay joojiso.

4. Taataabashada jireed ee aan la rabin ama fara-ka-ciyaarka.

    - **Tusaale**: Mark wuxuu masaajeeyaa garbaha danwadaaga mar kasta oo uu soo maro miiska ay fadhido, wuxuuna inta badan taabtaa cududdeeda marka ay hadlayaan.

    - **Tusaale**: Markay Debbie samaysay iib weyn, Joan wuxuu dhabar ayuu gacanta kaga dhuftay wuxuuna Debbie ku yidhi, “Waad dadaashay gabadhyahay!” Inkastoo Debbie ay u sheegtay Joan in aysan jeclayn kaftanka noocan ah, Joan ayaa yiyi, “Muuji farxad,” wuxuuna Debbie ka dharbaaxay dhabarka mar kale marka xigta ay Debbie samaysay iib weyn.

5. Foorida ama farahadalka aan habboonayn.

6. Adeegsiga fikradaha khaldan ee la aaminsan yahay ama dhibaataynta ku salaysan fikradaha khaldan ee laga aaminsan yahay jinsiga.

   - **Tusaale**: David wuxuu soo marsaday indho-kuul wuxuuna soo xirtay dhegodhego xilliga shaqada. Markuu yimid, Sally aad ayay u eegtay, waxayna weydiisay sababta uu waxyaabaha la isku qurxiyo u isticmaalay. Markuu David u sheegay inay maalintan ka qabatay inuu sidan sameeyo, Sally waxay u sheegtay inuu u muuqday qof qariib ah, iyo inaysan raggu isticmaalin waxyaabaha la isku qurxiyo.

7. Aflagaadada, cayda, deelqaafka ama faallooyinka bahdilka ah.

8. Faallo aan la jeclaysan oo ku saabsan muuqaalka qofka.

   - **Tusaale**: Markay Barbara soo xiratay surwaal xilliga shqada, Matt wuxuu ku kaftamay in labbiskeedu uusan ahayn mid si gaar ah loogu faani karo oo goono ay ku qurux badan tahay haddii ay soo xirato.

9. Kaftanka ku salaysan galmada ama adeegsiga luuqad galmo oo cad ama aflagaado ah.

10. Rabshadaha jinsiga ama lab ama dheddig ku saleysan.

11. Ku soo bandhigida goobta shaqada walxo ama sawirro galmo soo jeedinaya.

12. Dhibaataynta ku salaysan uurka, ama xaaladdadhalmada ama xaaladaha caafimaad ee la xiriirta ee shaqsiga, oo ay ku jirto naasnuujinta.

Faraxumaynta uma baahna inay noqoto mid daran ama qalqaalo ah si loo jebiyo siyaasadayada; waxay noqon kartaa habdhaqan kasta oo dhibaatayn ah oo ka kooban wax ka badan dhib yar ama carqalad yar. Waxaa intaas dheer, xitaa habdhaqanka u muuqda mid aan waxyeello lahayn marka keligeed dhacdo ayaa noqon karta jawi shaqo oo cadaawad abuuri karo waqti kadib.

Faraxumaynta ma ahan inay si cad u noqoto mid galmo dhiirigelinaysa ama nuxur ahaan ama jinsi ahaan ma ahan inay noqoto mid xadgudub ku ah siyaasadda Shirkadda. Sidoo kale ma ahan inay ka koobnaato isa soo qadimid galmo ama faallo galmo oo sharaf-dhac ah, ama faallooyin sheegaya in jinsiyada qaarkood inaan shaqada loogu talagalain. Faraxumaynta waxaa sidoo kale ka mid noqon kara xoog sheegashada, quudhsiga, hantaataqinta, jirdilka, dabamarka, faquuqida, majaxaabinta iyo habdhaqan kasta oo kale oo aan la rabin oo loo geysto shakhsiga iyadoo ugu wacan tahay jinsiga qofkaas.

Faraxumaynta waxay ka dhex dhici kartaa dadka lab iyo dhedig ah ama jinsi kasta leh; danwadaagta isku heerka shaqo ah ama danwadaagta heerarka shaqo ee kala duwan; danwadaagta isku shaqada ah; ama iibiyeyaasha; ama danwadaagta iyo macaamiisha. Waxaa geysan kara danwadaag heerkiisu sarreyo (sida maareeye ama kormeere) ilaa danwdaag heerkiisu hoose, balse sidoo kale danwadaaga heerkiisu hooseeyo ayaa u geysan kara danwadaaga heerkiisu sarreyo, tusaale ahaan, haddii danwadaag lab ah uu ka xanaaqo inuu hoos yimaado qof dumar ah oo kormeere ah uuna kula kaco habdhaqan dhibaatayn ah oo wiiqaya awooddeeda iyo waxqabadkeeda. Macaamiishu waxay sidoo kale danwadaagta soo sheegi karaan habdhaqanka dhibaataynta leh ee loo geysto danwadaagta, iyo wixii la mid ah.

Mamnuucideena ka dhanka ah dhibaataynta waxay sidoo kale khusaysaa xaaladaha ganacsiga ee aan rasmiga ahayn iyo munaasabadaha Shirkadda ay maalgaliso, oo ay ku jiraan xafladaha iyo safarada Shirkadda ama ganacsiga.

Sababtoo ah way adag tahay in la qeexo dhibaataynta sharci-darrada ah oo dhan, danwadaagta waxaa laga filayaa inay u dhaqmaan mar walba si habboon oo waafaqsan ujeeddada loogu talagalay Siyaasaddan.

Bath&BodyWorks

**KA WARBIXINTA DHIBAATAYNTA**

Haddi aynu ka warqabin in dhibaataynta ama habdhaqanka aan haboonayn ee goobta shaqada ay dhaceen, ma qaadi karno tallaabooyin ku haboon aan ku saxno. Sidaas awgeed, waxaanu si adag u dhiirigelinaynaa in si degdeg ah loo soo sheego dhammaan dhacdooyinka dhibaataynta ama habdhaqanka aan habboonayn ee ka dhaca goobta shaqada. Haddii aad tahay saaxiib, macmiil, iibiye, qandaraasle, ama lammaane kale oo ganacsi aadna aaminsan tahay in lagu dhibaateeyay ama aad wajahdo habdhaqanka goobta shaqada ee aan habboonayn ama aad aragtay midkood, fadlan gudbi warbixin.

Maamule kasta ama horjooge kasta, xitaa hadduu si kumeelgaar ah xilka u hayo, ee aaminsan inuu arkay aargoosi waa inuu soo sheegaa habdhaqanka. Fadlan guji halkan si aad u hesho Hagitaanka Ka Warbixinta Dhibaataynta, Takoorka & Ka Aargoosiga ee Shirkadda, oo ay ku jiraan macluumaadka la xiriira hababka baarista iyo xallinta ee Shirkadda, ama kala xiriir Anshaxa Caalamiga ah & U Hoggaansanaanta Anshaxa barta ethicsandcompliance@bbw.com.

Shakhsiyaadka waxaa sidoo kale lagula talinayaa inay si degdeg ah u diiwaangeliyaan dhacdo kasta oo ku lug leh dhibaataynta iyo faraxumaynta galmo ee sharci-darrada ah.

**AARGOOSIGU WAA MAMNUUC**

Qofna laguma khasbi karo, oo shirkadda Bath & Body Works waxay mamnuucayaan, nooc kasta oo anshax-marin, aargudasho, cabsi-gelin, ama aargoosasho ah oo ka dhan ah soo sheegida dhacdooyinka dhibaataynta nooc kasta ahaadaanba, raadsasho kasta oo qaansheegashada dhibaataynta, ama iska kaashiga baaritaannada la xiriira. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan siyaasadda shirkadda Bath & Body Works ee mamnuucaysa aargoosiga, fadlan guji guji halkan si aad u gasho Siyaasadda Kahortagta Aargoosiga ee Shirkadda ama kala xiriir Waaxda Anshaxa Caalamiga ah & U Hogaansanaanta Anshaxa barta ethicsandcompliance@bbw.com.

**ADEEGSIGA SIYAASADDAN**

Waaxda Anshaxa Caalamiga ah & U Hoggaansanaanta Anshaxa ayaa mas'uul ka ah adeegsiga Siyaasaddan. Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo khuseeya Siyaasaddan ama su'aalo ku saabsan dhibaataynta ee aan lagu xusin Siyaasaddan, fadlan la xiriir Waaxda Anshaxa Caalamiga ah & U Hoggaansanaanta Anshaxa barta ethicsandcompliance@bbw.com.